



talaalka ka hortaga coronavirus(COVID-19)

talaalka wuxu u shaqeyaa si uu diyaariyo nidaamkaaga difaaca si uu ula dagaalamo coronavirus hadi ad qaado (COVID-19) .

waxaa jira 3 nooc oo talaalka ah oo laga heli karo Malta – **Pfizer, Moderna and Astra Zeneca.**

tallaalada la oggolaaday badankood waxaa lagu siinya labo jiir

ka dib tijaabooyin badan talaalka waxa la ogaaday in yahay mid amiin ah oo la siin karo dadka da,doodu tahay 16 sano iyo wixii ka sareeya.

talaal ku waxa u waxtar u yahay ka hortaga caadiga ah ee coronavirus covid 19 laakin waxtar yar ayuu u leeyahay noocyadiisa kale **(COVID-19)**

talaal ku wuxu yarenyaa fursadaha qaadista coronavirus **covid 19** hadi ad qado, waxana yaraan doona inaad u gudbiso fayraska dadka kale.

talaalka waxa lagu bixin doona lacag la,aan waxana laga heli kara hay,adaha dowlada oo keliya.

dhamaan muwaadininta Malta iyo dhamaan dadka degan Malta oo wata dokumenti aqoonsi ah ayaa xaq uleh talaalka.

lama siin karo carurta da,doodu tahay ila 15 sano iyo haweenka uurka leh iyo kuwa talaal kale ku yeeshay fal celin an caadi ahayn.

waxyeeelooyinka talaalka way yar yihiin waxyna ka kooban yihiin gacmo xanuun qandho iyo daal iyo facelo kale oo cadi ah oo talaalka ah

shaqada wacan ee talalka waxay naga caawin doonta yareynta faafitaanka cudurka **covid 19** , wana inaad weli si xirita maaskarada si na ilaalisa masaafada bulshada gacmahna iska dhaqda oo ad raacda talaabooyinka lagu xakameynayo ee soo saartay caafimaadka bulshada . **ilaali dhamaan talaabooyinka xakamaynta cudurka xata ka dib marka aad is talaasho si loo joojiyo faafitaanka!**

hadi aad su,aalo qabtid ku saabsan qadashada talaalka adiga oo egaya xaladaada caafimaad waa inaad kala hadashaa dhakhtarkaaga wac khadka caawinta talaalka ee covid 19 ee talefonka 145 ama u dir iimayl covid-vaccine@gov.mt

Unhcr Malta ma aha isha rasmiga ah ee macluumaad kan Unhcr malta ayaa turjuntay macluumaad kan si ay kugu diyaariso luuqad ad fahmayso iyo sida ad ula wadaagto macluumaad kan qaxootiga iyo magangelyo doonka Malta .

wixii macluumaad dheeri ah ee la turjumay ee ku saabsan talaalka covid 19 fadlan booqo

<https://www.unhcr.org/mt/news/covid-19-information-for-malta>.

isha: kobcinta caafimaadka iyo kahortagaa cudurada Malta